

2017 Dhamaan Tilmaanta Dib u Cusboneysiinta

Dib u cusboneysii dhamaan waxyaabahaan iyaga oo wadajira gudaha gaarigaada!



Weelasha

Faaruuqi kaddibna biyo raaci, calaamdaha waa hagaag

- Qasacyada aluuminiyumka iyo birta; warqadda kariska iyo saysarka
- Dhallooyinka glaaska iyo koobabka waaweyn (Ka saar daboolka)
- Kartoonada caanaha, juuska iyo maraqa (Ka saar daboolada)
- Inta badan weelasha blaastiigga raashinka iyo cabbitaanka (Faaruqi, biyo raaci, ku dhaaf daboolka.)

CUSUB: Weelasha raashinka baakada wareegsan! (Pringles™, loos, iwm.)



Sanduuqyo

Fidi iyo faaruqi

- Baako
- Geynta sanduuqyada biidsada
- Baakada (badarka, krakarka, kabaha, iwm.)

CUSUB: Sanduuqyada la qaboojiyay (lama ogola sanduuqyada qaboojinta), tubooyinka warqadda musqusha iyo tubooyinka warqadda shukumaanka!



Dibadda u soo saar ugu dambayn 7:00 a.m.



Warqad

- Wargeysyada (iyo waxyaabaha la geliyo)
- Majaladaha, warqadaha boostada iyo buugaagta telefoonka
- Warqadaha xafiiska iyo warqadaha la isticmaalay (warqadaha la jeexjeexay waa in aad gelisid gudaha gaariga adiga oo rida bac xeran, la calaameyay oo ka samaysan warqad.)

Dib u Isticmaalidda ka jirta Abarmanada

Haddii aad daggan tahay abarman, waxaad alaabta dib loo isticmaali karo gelisaa gudaha gawaarida dib u isticmaalka yaala bartamaha ama qashin qubka loogu talagalay dhismaha.

Haddii aadan lahayn adeegyo ku filan dib u isticmaalka, fadlan la hadal maamulaha hantida ama la xariir Eureka Recycling, telefoonka 651-222-7678.

Lama ogola xash (styrofoam), blaastiigga madow ama weelasha ka weyn 3 galan.

Si aad u heshid macluumaad badan oo ku saabsan wasakhda halista, wasakhda dibadda, ama waxyaabaha kale ee kala duwan, booqo www.RamseyRecycles.com/AtoZ

LAMA OGOLA QASHIN



Maya Bacyada Blaastiigga



Lama Ogola Wasakhda Halista



Lama ogola waxyaabaha fiqan



Lama ogola Raashin ama Dareere



Lama Ogola Wasakhda Dibadda



Maya Haamanka Shidaalka

Dhaqaaji Gaarigaada Cusub!

Bishii Janaayo 16, 2017, Saint Paul waxay bilowday in ay soo aruuriso dib u cusboneysiinta gaariyada lugaha leh, ee daboolan. Gaariyada dib loo cusboneysiyo ee loo isticmaalo siistemka aruurinta automaatiga waxay boos badan siin doonaan alaabta dib loo cusboneysiyo iyo waxay yareyn doonaan qashinka iyaga oo waxyaabaha ku haaya gudaha gaariga. Baro sida loo isticmaalo gaarigaada cusub adiga oo nagu kaalmeeyo in aan in badan dib u cusboneysiino!



- Alaabta dib loo cusboneysiin karo laguma ridi karo baaldiyada baluugga, weelasha kale ama bacyada warqadda dibadda gaariga.
- Dhamaan alaabta waa in si dabacsan loo dhigo gudaha gaariga kaddibna la daboolo. Ha dhigin baako dheeraad ah meesha ku xigta gaarigaada.
- Xasuuso in aad gaarigaada ka dhaqaajisid dhinaca lagu socdo kaddib marka la qaado.



Si loo hubsado in gacmaha makaanikada baabuurka uu soo qabto gaarigaada, fadlan hubso in:



1. Waa in uu ugu yaraan labo cag u jiro shay kasta sida garaashka, gaariyada qashinka, geedaha, siligga, iwm. Ha dhigin gaariga darbiga korkiisa ama gadaashiisa, gudaha siligga ama gadaal ha ka dhigin baabuur.
2. Geeska luuqa ama dhinaca lagu socdo iyo falaarta saaran daboolka korkiisa oo dibadda loo jeediyo..
3. Ka fogeey barafka. Ha dhigin gudaha ama korka ha ka saarin baraf buuran, ama gudaha biyo fadhiya (si leysaga ilaaliyo qabowga dhulka waqtiga qaboobaha).

Haddii booska kugu yar yahay ama aad u baahan tahay qiyaas badan, waxaa la heli karaa gaari yar (32 galan) ama gaari weyn (95 galan). Waxaad codsan kartaa in gaarigaada lagu baddalo kaddib marka ay dhamaato muddada 90 maalin ee ku meel gaarka (Abriil 16) kaddib marka aad wacdid Eureka Recycling, telefoonka 651-222-7678.

Si aad u aragtid dhamaan weyniga iyo cabbirada gaariga, booqo stpaul.gov/recycle.

Maalmaha Aruurinta

Dib u cusboneysiinta Saint Paul waxaa la aruuriyaa hal mar todobaadkii. Maalmaha aruurinta dib u cusboneysiinta cusub waxaa la bilaabay Janaayo 16, 2017. Si aad u ogaatid maalinta cusub ee lagaa aruuriyo, booqo stpaul.gov/recycle.

Aruurinta dib u cusboneysiinta waxaa dib loo dhigi doonaa hal maalin haddii ay ku soo toosto fasaxyada la aqoonsan yahay ama kaddib ee soo socda:

- Maalinta Xasuusta
- 4ta Luulyo
- Maalinta Shaqada
- Mahadnaqa
- Maalinta Dhallashada Ciise
- Maalinta Sannadka Cusub



Xarunta La Geeyo

Alaabta dib loo cusboneysiin karo ee la ogolaaday waxaa kaloo la geyn karaa xaruntena dib u cusboneysiinta lacag la'aanta ah ee la geeyo alaabta, lagana qabto dadka daggan Saint Paul iyo ganacsatada yaryar.

309 Como Avenue South, Saint Paul

- Isniin-Jimco 8 am – 4:30 pm
- Sabti: 8 am – duhurnimada

Wixii su'aal ah?

Macluumaadka waxaa lagu heli karaa Soomaali marka la waco Eureka Recycling, telefoonka 651-222-7678. Ama booqo visite stpaul.gov/recycle